

Doorashada daryeel-caafimaadeedka gobolka stockholm

Waa daryeel-caafimaadeed oo kan waayahaan danbe ka sii wanaagsan

Laga bilaabo bisha janaayo 2008, waxaad adiga iyo dhammaan dadwaynaha gobolka Stockholm ku nool, awoodi doontaan doorashada rugta daryeelka caafimaadeedka ee aad doonaysaan, iyado an la tixgelin degmada aad ka tirsan tahay. Doorashada daryeel-caafimaadeedka gobolka Stockholm waa iyado u qofku jeebkiisa ku sito kharashkii daryeel caafimaadeedkii loogu talagalay. Haddaba kharashka daryeel-caafimaadeedka lagaa bixin doono, waa hadba daryeelkii aad dooratay. Sidaasna ma jiri doono daryeel qaali ah ama dhibaato keeni doono. Teeda kale, qofku hab fudud ayuu rugta daryeelka caafimaadka isaga bedel kara, oona ku heli doona takhtar isaga ku habboon. Laakinse awooda doorashada daryeel-caafimaadeedka Stockholm, ma aha arrin doorashada oo kaliya ku salaysan, ee waa arrin loogu gogolxaarayo sidii lagu heli laha daryeel-caafimaadeed ka fiican kan imminka la heli karo. Iyo sidii loo kordhin lahaa tirada xarumaha daryeel-caafimaadeedka, hoos na loogu dhigi safafka daryeel-caafimaadeedka loogu jiro iyo in hab casri ah loo feker. Fidinta awooda doorashada iyo kordhinta tirada xurumaha daryeelka ka sokkoo, doorashada daryeel-caafimaadeedka Stockholm waxay xarumaha takhtarrada qoysaska ku soo rogaysa shuruudo cusub.

Shuruudaha cusub waxa ka mid ah in xarumaha daryeel degdeg ah laga heli karo ilaa saddex sac habeenimada, in xarumaha laga heli karo la taliyaha loo yaqaanno "kurator" ama takhtarka caafimaadka maanka, iyo in xarunta laga heli karo daryeel-caafimaadeedka bukaha isago aqalkiisa ku sugan. Teeda kale, waayeelada waa in ay awoodi karaan doorashada tahtarrada aqoonta gaarka u leh daryeelka waayeelada jirran, qoysaska carruurta leh takhtarka caafimaadka carruurta, iyo in xarumaha takhtarrada qoyska laga heli karo xiriir-takhtareed oo joogto ah. Doorashada daryeel-caafimaadeedka Stockholm waxay ku suurtagelineysa saamayn ku yeelansho, wax ka bedelid iyo doorasho laga fiirsaday. Haatan, adiga ayaa awooda taliska iska leh. Daryeel-bixiyeyaashu-na waxa xilsaaran in ay ku raali-geliyaan.

Hab fudud ayaa ku dooran doonta

Doorashada daryeel-caafimaadeedka Stockholm waxay ku suurtageli doonta inaad hab fudud u doorato takhtarka qoysaska, rugta daryeelka caafimaadka carruurta, rugta daryeelka hooyoyinka, daryeel-caafimaadeedka cagaha, iyo takhtarka loo yaqaanno (logoped). Aayaha danbe waxaad awoodi doontaan doorashada daryeel-caafimaadeed waafaqsan qaabka doorashada daryeel-caafimaadeedka, xitaa haddii daryeelku u yahay daryeel-caafimaadeed nooc kale ah.

Doorashada horaanteed qofku wuxuu u baahan yahay warbixin, u suurtagelisa is bar-bardhigida xarumaha daryeelka caafimmaadka. Sidaas awgeed, Gole-goboleedka arrimaha caafimaadka ee Stockholm (Stockholms läns landsting), wuxuu soo bandhigi doona warbixinta dhammaan xarumaha caafimaadka, sida saacadaha ay furan yihiin, sida ugu fudud ee taleefanka loogula xiriiri karo, iyo aragtida bukaha u ka qaabo sida loo soo dhaweeyay. Laga bilaabo bisha janaayo

2008 waxaa la heli doona warbixintaas oo idil, oo (af iswiidish ah) kuwaaso laga heli doono bogga Internetka www.vardguiden.se iyo Vårdguiden taleefan, 08-320 100.

Kuwa adiga ku baaro ayaan anagu baari doona

Dhammaan xarumaha daryeelka caafimaadka oo ka tirsan Doorashada daryeel-caafimaadeedka Stockholm waa in ay marka hore caddaynta karti-xirfadeedka ka helaan Gole-goboleedka arrimaha caafimaadka ee Stockholm. Waa dhaqan khuseeya xarumaha daryeelka caafimaadka imminka jira iyo kuwa la dhisi doono ba. Shuruudaha karti-xirfadeedka waa kuwo heer sare ah. Haddaba markii rugta daryeelka caafimaadka ay buuxiso shuruudahaas ayee xaq uu leedahay in ay furto.

Shuruuda karti-xirfadeedka wuxuu khuseeya dhammaan xarumaha daryeel-caafimaadeedyada – kuwa Gole-goboleedka iyo kuwa gaar ahaan loo maamula, tayadooduna hab joogto ah ayuu Gole-goboleedka arrimaha caafimaadka sare ugu qaadi doona. Haddii rug kamid ah rugaha daryeelka caafimaadka aysan waajibaadkeeda gudan, waxa laga ciribtiri doona karti-xirfadeedkii beri hore la siiyay.

Sidatan ayaa la yeela

Markii aad doonayso inaad doorato xarun kamid ah xarumaha daryeelka caafimaadka qoysaska ama rugta daryeelka caafimaadka carruurta, waxaad xarumaha daryeelka caafimaadka qoysaska ama rugta daryeelka caafimaadka carruurta ee kugu dhow ka soo qaadan karta foomka Doorashada daryeel-caafimaadeedka. Waxaad kalo foomka ka dalban karta (Vårdguiden) taleefan, 08-320 100 (af iswiidish) ama ka duuban karta www.vardguiden.se. Foomka doorashada buuxsan waxaad markaas kadib u soo diraysa xarunta daryeelka caafimaadka aad dooratay. Teeda kale, waxaad awooda doorashada ama iska bedelaada rugta daryeelka caafimaadka adigo adeegsanaayo adeega internetka ee (Vårdguiden – mina vårdkontakt)

Uma baahnid inaad iska bedesho

Haddii aad ku qanacsan tahay rugta daryeelka caafimaadka aad imminka ka tirsan tahay, xaaladaas u ma baahnid inaad iska beddesho. Laakinse haddii aad doonayso waa iska beddeli karta, mar alle markii aad doonayso iyo intii jeer aad doonayso, waxaana mar kasta xaq ku leedahay inaad saf u gasho rugta daryeelka caafimaadka aad doonayso – waa haddii ay buuxdo.

Halkaan ayaa warbixin ka heli karta

Warbixinta hab xiriirka iyo kuwa kale ba ee ku saabsan xarumaha daryeelka caafimaadka kala duwan, waxaa laga heli karaa Vårdguiden, www.vardguiden.se iyo Vårdguiden taleefan, 08-320 100 (af iswiidish). Xarumaha daryeelka caafimaadka dhammaantood waxaa ka heli doonta buugga taleefonada qaybta Vårdguiden, kaso biloowga bisha janaayo 2008 lagugu soo tuuri doono sanduuqa boostada.

*Degmada Norrtälje kama tirsana Doorashada daryeel-caafimaadeedka Stockholm.

Doorashada/iska beddelka takhtarka qoysaska (huslākare)/Val/byte av huslākare

Foomkaan, kadib markii aad buuxiso, waxaa geeyso rugta takhtarka qoysaska oo aad dooratay. Haddii takhtarka aad dooratay uu leeyahay liiska sugitaanka, waxaa kula soo xiriiri doono hawlwadeneeyada rugta. Doorashadaada waxay hirgeli karta oo kaliya haddii foomka aad ku soo qorto taariikhda oona magacaaga ku saxiixan yahay.

Magaca/Namn	Tobbanka lambar ee aqoonsiga/Personnummer (10 siffror)
Magaca waddada/Gatuadress	Adreeska boostada/Postadress

Waxaan dooranayaa /Waxaan codsanaaya in aan ku beddesho/Jag väljer/önskar byta till

Takhtarka qoysaska/Huslākare	Rugta takhtarka qoysaska/Huslākarmottagning	
Taariikhda/Datum	Saxiix/Namnunderskrift	Lambarka taleefanka (maalintii) /Telefon dagtid

Somaliska



Doorashada/iska beddelka takhtarka qoysaska – carruurta iyo dhallinyarada da'dooda ka hoseeyso 18 sano/ Val/byte av huslākare – Barn och ungdom under 18 år

Foomkaan, kadib markii aad buuxiso, waxaa geeyso rugta takhtarka qoysaska oo aad dooratay. Haddii takhtarka aad dooratay uu leeyahay liiska sugitaanka, waxaa kula soo xiriiri doono hawlwadeneeyada rugta. Doorashadaada waxay hirgeli karta oo kaliya haddii foomka aad ku soo qorto taariikhda oona magacaaga ku saxiixan yahay.

Magaca xilhayaha/waalidka/Vårdnadshavarens namn	Tobbanka lambar ee aqoonsiga ee xilhayaha/waalidka/ Vårdnadshavarens personnr (10 siffror)
Magaca waddada/Gatuadress	Adreeska boostada/Postadress
Magaca cunugga/Barnets namn	Tobbanka lambar ee aqoonsiga ee cunugga/Barnets personnummer

Cunugga waxaa u dooranayaa / Waxaan codsanaaya in aan ku beddesho/För barnets räkning väljer/önskar byta till

Takhtarka qoysaska/Huslākare	Rugta takhtarka qoysaska/Huslākarmottagning	
Taariikhda/Datum	Saxiix/Vårdnadshavarens namnunderskrift	Lambarka taleefanka (maalintii) /Telefon dagtid

Somaliska



Doorashada/iska beddelka rugta daryeelka caafimaadka carruurta/ Val/byte av barnvårdscentral (BVC)

Foomkaan, kadib markii aad buuxiso, waxaa geeysa rugta daryeelka caafimaadka carruurta ee aad dooratay Doorashadaada waxay hirgeli karta oo kaliya haddii foomka aad ku soo qorto taariikhda oona magacaaga ku saxiixan yahay.

Magaca cunugga/Barnets namn	Tobbanka lambar ee aqoonsiga ee cunugga/ Barnets personnummer (10 siffror)
Magaca waddada/Gatuadress	Adreeska boostada/Postadress

Waxaan dooranayaa /Waxaan codsanaaya in aan ku beddesho/Jag väljer/önskar byta till

Rugta daryeelka caafimaadka carruurta/Barnvårdscentralen		
Magaca xilhayaha/waalidka/Vårdnadshavarens namn	Tobbanka lambar ee aqoonsiga ee xilhayaha/waalidka /Vårdnadshavarens personnr (10 siffror)	
Taariikhda/Datum	Saxiix/Vårdnadshavarens namnunderskrift	Lambarka taleefanka (maalintii) /Telefon dagtid